





LA HAANSHAHA, AHAANSHAHA, IYO NOQOSHADA

Qaabka Waxbarashada
Sannadaha Hore ee Australia



BELONGING,
BEING &
BECOMING

An Early Years Learning
Framework for Australia

Macluumaadka loogu
talagalay qoysaska

Somali

QAABKA WAXBARASHADA EE SANNADAHHA HORE

Qaabka cusub ee waxbarashada sannadaha hore ee qaran looguna talagalay carruurta dhalatay iyo ilaa shan sanno jirka.

MUXUU KU SAABSAN YAHAY QAABKAN WAXBARASHADA CUSUBI?

Waxaan sameynay Qaabka Waxbarashada Sannadaha Hore si loo hubiyo inuu ilmahaagu helo barnaamijyo waxbarasho oo tayo leh carruurnimadooda hore. Kani wakhti muhiim ah ayuu u yahay oo ay wax ku bartaan kuna koraan. Aragtida qaabkan waxaa weeye in dhammaan carruurta ay helaan waxbarasho kicineysa, dhiseysa guusha noloshooda.

Waa tuse loogu talagalay barayaasha carruurnimada hore ee la shaqeeya carruurta laga bilaabo dhalasho ilaa shan sanno jir. Waxay isticmaali doonaan Qaabka iyagoo la shirkoobaya qoysaska, carruurta barayaashooda ugu horeeya ee saameynta ugu badan ku leh, si loo horumariyo barnaamijyo waxbarasho oo ka jawaabaya carruurta fikradahooda, xiisahooda, waxay ku xoogan yihiin iyo awoodooda, iyo in la aqoonsado in carruurta ay wax ku bartaan ciyaartooda.

Qaabka Waxbarashada ee Sannadaha Hore wuxuu u sharxaa carruurnimada sida wakhtigii *lahaanshaha*, *ahaanshaha* iyo *noqoshada*.

- **Lahaanshuhu** waa aasaaska ku noolaanshaha nolol buuxda. Carruurta waxay dareemaan inay leeyihiin oo ay ka mid yihiin sababtoo ah xiriirka ay la leeyihiin qoyskooda, bulshada, dhaqanka iyo meesha.
- **Ahaanshuhu** waa ku noolaanshaha halkan iyo hadda. Carruurnimada waa wakhti khaas ah oo nololeed carruurtuna waxay u baahan yihiin wakhti ay 'ku ahaadaan' – wakhti ay ku ciyaaraan, ay isku dayaan waxyaalo cusub oo ay iska madadaashaan.
- **Noqoshada** waxay ku saabsan tahay waxbarashada iyo koritaanka ee ay carruurta da'da yari soo maraan. Carruurta waxay bilaabaan inay sameystaan dareenkooda aqoonsi da'dooda hore, oo qaabeysa nooca qofka weyn ee ay noqon doonaan.





“Waxaan doonayaa inuu ilmahaygu uu yeesho fursado badan oo leh ciyaaraha hal abuurka leh”

CIYAARTU WAA WAXBARASHO

Ciyaartu muhiim bay u tahay carruurta laga bilaabo daqiiqada ay dhashaan. Inkastoo ciyaarta ilmaha dhashay iyo carruurta yar yarba ay sahamiyaan oo ay bartaan si ay u fahmaan aduunka ku hareeraysan iyaga isla markay bilaabaan inay hadlaan, ay ogaadaan, ay qiyaasaan oo ay abuuraan.

Markay carruurta ciyaaraan waxay muujinayaan waxay bardeen iyo waxay iskudayaaan inay fahmaan. Taasi waa sababta ciyaartu ay u tahay mid ka mid ah aasaaska Qaabka Waxbarashada Sannadaha Hore.

Iyadoo isticmaalaya Qaabkan barayaashu waxay hagi doonaan ilmahaaga ciyaartiisa iyadoo si taxadar leh u sameynaya nashaadka waxbarashada iyo jewayada waxbarashada bannaanka iyo gudaha ee kicinta leh.

XIRIIRKU WAA FURE

Waa wax lawada yaqaan in carruurta si fiican wax u bartaan markay la leeyihiin xiriir sugan dadka waa weyn ee xannaaneeye. Marka carruurta da'dooda horeba ay sameystaan xiriir kalsooni leh waxay dareemaan inay isku kalsoon yihiin waxayna awoodaan inay wax sahamiyaan oo ay bartaan.

Goobaha hore ee carruurnimada, markay carruurta dareemaan dareen maskaxeed ahaan kuwo sugan waxay sameysan karaan xirfado iyo fahamka ay u baahan yihiin si ay kuwa kale si wanaagsan ugu dhexgalaan oo ay si tartiib ah u bartaan inay masuuliyad qaadaan.



SIDEE BAY U SHAQEYN DOONTAA?

Barrayaashu waxay ku isticmaali doonaan Qaab cusub meelaha carruurnimada, oo ay ku jirto xannaano maalmeedka dheer, dugsiga ka hor iyo xannaano maalmeedka qoyska si loo hubiyo in ilmahaagu helo khibrad tayo leh oo sare. Waxaa abuuray oo tijaabiyey barayaasha carruurnimada hore oo khibrad leh, macalimiinta jaamacadaha, waalidiinta iyo xannaaneeyayaasha.

Qaabku wuxuu xoogga saarayaa ilmahaaga waxbarashadiisa. Barayaashu way kula shaqeynayaan si ay si fiican ugu bartaan ilmahaaga. Waxay abuurayaan barnaamij waxbarasho oo dhisaya xiisaha iyo awooda ilmahaaga oo kulana socodsiinaya horumarka ilmahaaga.

Inkastoo Qaabkan shantiisa ujeedo ee waxbarid ee ay barayaashu ka caawin doonaan ilmahaagu inuu yeesho:

- Dareen xoogan oo ah aqoonsigooda
- Ku xirnaantooda aduunkooda
- Dareen xooggan oo wanaag leh
- Isku kalsoonaantooda iyo ku lugyeelashadooda waxbarashadooda; iyo
- Xirfadooda isgaariineed oo rasmi ah.

“Natiijada
waxbarashada waa
mid wanaagsan
oo iga caawineysa
inaan ka fekerro
sida ilmaheygu
u horumarayo”





“Qaabka Waxbarashada Sannadaha Hore waxay iga caawineysaa fahamka khibrada ay leeyihiin shaqaalaha jooga xaruntayda iyo taageerada weyn ee ay I siiyaan aniga iyo qoyskayga”

DAAWASHADA ILMAHAAGA HORUMARKIISA

Isticmaalida Qaabka Waxbarashada Sannadaha Hore barayaashu waxay fiirin doonaan waxbarashada ilmahaaga si ay halkaas uga sii dhisaan oo ay u qorsheeyaan tallaabooyinka ku xigga. Sidaan ayey sameynayaan iyagoo dhageysanaya, daawanaya lana hadlaya ilmahaaga.

Waxay kuula soo xiriirayaan si joogta ah si ay kaala hadlaan horumarka ilmahaaga. Waxaa laga yaabaa inay isticmaalaan sawiro ama ay haystaan faylka ilmahaaga shaqadiisa si ay kuu tusaan waxa ilmahaagu baranayo, iyo siday u korayaan iyo waxay xiiseeyaan.

Ka hor intaanu ilmahaagu dugsiga bilaabin barayaashu waxay diyaarin doonaan macluumaadka ku saabsan waxbarashada ilmahaaga iyo koritaankiisa si ay ula wadaagaan macalinkooda cusub. Tani waxay caawineysaa inay hubiso in ilmahaaga dugsigiisa cusubi uu si fiican ugu diyaarsan yahay inuu sii wado waxbarashada ilmahaaga.


WADA SHAQEYNTA

Wada shaqeynta waalidiinta iyo barayaasha ayaa kor u qaadi karta ilmahaaga waxbarashadiisa iyo wanaagisaba.

Qofka ugu muhiimsan ahaan ilmahaaga noloshiisa waxaad sameyn kartaa isbedel weyn lahadalkaaga joogtada ah ee baraha hore ee ilmahaaga iyo tusida xiisaha waxbarashadooda.

Macluumaadka aad bixisaa wuxuu u ogolaanayaa barayaasha inay ku xiraan khibrada ilmahaaga guriga wakhtiga ay wada joogaan meesha carruurnimada hore.





RAADI WAX KA SII BADAN

Buggan yar waa horudhaca Qaabka
Waxbarashada ee Sannadaha Hore.

Si aad u raadiso wax ka sii badan, booqo
deewr.gov.au/earlychildhood ama weydii baraha
carruurnimada hore ee ilmahaaga.

Produced by the Australian Government Department of Education, Employment
and Workplace Relations for the Council of Australian Governments.

A09-057

